Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Febraayo 19, 2021

Ku socota: Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Ra'yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha NCI ee 2020

Shaqaale xasilooni wuxuu muhiim u tahay taageerida dadka qaba I/DD si ay nolol buuxda ugu noolaadaan bulshadooda dhexdiisa oo loo xaqiijiyo caafimaadkooda iyo badbaadadooda.

Hal dariiqo oo lagu qiimeeyo xasiloonida shaqaalaha Xirfadlayaasha ah ee Taageerada Tooska ah (DSP) waa iyada oo la adeegsanayo ra'yi ururinta xasiloonida shaqaalaha ee Muujiyayaasha Xudunta u ah Qaranka (NCI). NCI waa dadaal wada shaqayneed oo ka dhexeeya Ururada Qaranka ee Agaasimayaasha Gobolka ee Adeegyada Naafanimada Koriinka iyo Machadka Cilmi-baarista Adeegyada Dadweynaha.

Marka ay noqoto ra'yi ururinta xasiloonida shaqaalaha, NCI waxay la shaqeysaa gobolada xubnaha ka ah si loo soo ururiyo xog dhammeystiran oo ku saabsan DSP-yada dadka qaba I/DD kula shaqeeya meelaha la degan yahay, guriga-dhexdiisa iyo/ama goobaha shaqada.

Isugeyn dhan 26 gobol oo ay dheer tahay District of Columbia ayaa ka qayb qaatay ra'yi ururintii 2019. Ujeedada laga leeyahay ra'yi ururintani waa in ay gobolada ka caawiso in ay xogta shaqaalahooda qiimeyaan oo barbardhigaan ta gobolada kale si loo sameeyo horumar iyada oo la adeegsanayo siyaasad ama isbeddel lagu sameeyo barnaamijka.

Halkan waxaa ku qoran dhawr qodob oo muhiim ah oo ka socda natiijooyinka ra'yi ururintii 2019:

- Mushaharka iyo faa'iidooyinka: Celceliska mushaharka saacadii la qaato ee DSP ee Oregon wuxuu ahaa $14.59 iyada mushaharka lagu bilaabayo uu ahaa $13.65.
- Shaqo ka tegida/beddelaada shaqaalaha: Celceliska heerka shaqo ka tegida/beddelaada shaqaalaha ee Oregon wuxuu ahaa boqolkiiba 49.4; iyada oo celceliska NCI uu ahaa boqolkiiba 38.2.
- Muddada la soo shaqeeyay: Boqolkiiba 23.7 oo ah DSP-yada ku nool Oregon ayaa shaqada ku jiray wax ka yar lix bilood iyada oo boqolkiiba 56.4 ay ku jireen 12 ama ka badan.
- Heerarka shaqada bannaan: Heerka shaqada bannaan ee Oregon ee loogu talagalay DSP-yada shaqada buuxda haysta wuxuu ahaa boqolkiiba 9.2 marka loo eego celceliska NCI oo dhanaa 7.6.

Daraasadda kuma jiro xogta Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed ama xogta Kooxda Xasilinta Dhibaatooyinka.

Oregon Sharciga Oregon (ORS 433.434) ayaa daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay ee I/DD uga baahan in ay buuxiyaan ra'yi ururinta xasiloonida shaqaalaha si loogu wargeliyo go'aanada siyaasadeed ee mustaqbalka iyo taageerada wada hadalada dhanka maalgelinta ee lala leeyahay Sharci dejinta.

Waxaa intaasi dheer, sida uu dhigayo OAR 411-325-025(4)(a): "Adeeg bixiye waa in uu xogta shaqaalaha ee sanadlaha ah u gudbiyaa ururka warbixinta ra'yi ururinta oo qaran ahaan la dejiyay ee ay qeexday Waaxdu (Oo joogto ah laga bilaabo 2/15/19)." Daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay ee 24-saacadood ah ee aanan buuxin ra'yi ururinta waxaa dhici karta in ay mutaan ciqaab madaniga ah sida uu dhigayo OAR 411-325-0460(2)(a)(A).

ODDS waxay Ra'yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha NCI u isticmaashaa soo ururinta xogta si loo buuxiyo shuruudahani. Daryeel bixiyayaasha guriga koox ahaanta loo degan yahay oo dhan waxaa looga baahan yahay in ay ka qayb qaataan, sida uu dhigayo sharcigu iyo OAR. Waxaanu sidoo

kale si aad ah ugu dhiirigelinaynaa in ay dhammaan hay'adaha daryeelka bixiyaa ka qayb qaataan.

Marka lagu daro ra'yi ururinta qaranka, ODDS waxay heshaa warbixinta xasiloonida shaqaalaha ee sanadlaha ah oo diiradda lagu saaro hay'adaha bixiya daryeelka guriga koox ahaanta loo degan yahay ee 24-saacadood ah. Tani waa ra'yi ururin muhiim ah sababta oo ah waxay ODDS iyo hay'adaheeda bixiya daryeelka guriga koox ahaanta loo degan yahay ee 24-saacadood ah ka caawisaa in ay si wanaagsan u fahmaan shaqaalaha DSP ee hadda jira oo qiimeyaan waxyaabaha saameynta ku yeelan kara xasiloonida shaqaalaha DSP. Warbixinta ra'yi ururinta Oregon waxaa la soo galiyay qaybta Xaqiijinta Tayada (Quality Assurance) ee website-ka ODDS.

Horraanta Maarso, daryeel bixiyayaashu waxay heli doonaa email cinwaankeedu yahay "Ra'yi ururinta Xasiloonida Shaqaalaha OR NCI ee 2020 (OR NCI Staff Stability Survey 2020)." Email-ka waxaa la socon doona meel laga sii gelayo ra'yi ururinta iyo meel laga sii gelayo fiidiyow wax laga baranayo oo ku saabsan sida loo buuxinayo ra'yi ururinta. Haddii daryeel bixiye email-kiisu uusan ahayn mid cusub, daryeel bixiye waa in uu filaa wicitaan ka socda ODDS si loo helo cinwaan email oo sax ah. Ra'yi ururinta waa in lagu buuxiyaa muddo aan ka dambeyn Juun 30, 2021.

Waad ku mahadsan tahay ka qayb qaadashadaada ra'yi ururintani muhiimka ah.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa
http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.